Uurdoox: Mashruuca Islaamka ee Soomaaliya- Qaybta 11-aad

Akhristayaasha waa u cudurdaaranaa kala go'ii ku yimid maqaaladan oo aan mar hore billaabay oo aan jeclahay in aan sii wado ilaa aan ku keeno maanta.

Isbadal xoogleh ayaa socdo,wax bandanna waa soo caddaanayaan, bilowgii qoraaladan waxaa ku jiray erayadaydii " **Wixii gaalo u shaqeeyo waa soo bixi doonaan**"

Kaddib markii Al-shabaab ku eedeeyeen culimadii soomaaliyeed in ay gaalo u shaqeeyaan.Abu Yasir oo ka tirsanaa al-shabaab wuxuu yiri " Axmed Godane Gaaluu u shaqeeyaa".(Halgan.net).

1986 waxay ahayd xilli wax badan ay kar karayaan Soomaaliya, maxkamaddii wadaadada waxay ku dhamaatay qaar dil lagu xukumay, qaar sanooyin badan lagu xukmiyey iyo qaar lasii daayey.

Ragga dilka lagu xukumay waxaa kamid aha Sh. Cabdulcasiis Faarax Maxamad, Sh Xassan Dahir Aweeys, Sh Nuur Baaruud Gurxan iyo Sh Xashi Colhaye.

Inta xabsiga dheer lagu xukumay waxaa ku jiray Habarwaa,sh cabdirizaq imaamkii masjidka Muuse Boqor. Ragga lasii daayey waxaa ku jiray sh Cabdullaahi Cali Hashim (xaashi).

Waxaa laga soo dareeray maxkamaddii iyadoo aad loo murugeeysanyahay, dadkiina ku noqotay lama filaan, laakin dadka waxaa ka maqnayd in waxa garsoorka qaaday ay tahay Maxkamadda Badbaadada Dalka(MBD) oo loo dhisay in ay wax ku xukunto kolba sida ay u aragto siyaasadda kacaanka ee la xiriirta amniga qaranka. (Amnul Qomwi- National security)

Sidaan soo sheegay xukunka maxkamaddaan rafcaan malaha aan ka ahayn in madaxweeynaha dalka Maxamad siyaad Barre loo qorto codsi cafin,waana tallaabada ay ku dhaqaaqeen qareennadii iyo eheladii dadkii la xukumay.

Culimmada markaan xabsiga ku booqday waxaan ugu tagay iyadoo loo wareejiyey qaybta dilsugayaasha ee amaankeeda aadka loo adkeeyey,waxaa ku jiray Sh xaashi colhaye oo wayeel ah xanuunno badanna qaba,ummadda muslimiinta waxay u ahayd waqti adag oo nin waliba leeyahay goormaa idaacadda ka maqli doontaan waa lagu fuliyey xukunkii dilka eedasanayaashii ay MBD ku xukuntay dilka kaddibna lagu qaado heestii ahayd "sama diidoow dabinaa kuu dhigan lagugu dili doonoo".

Lagasoo billaabo 1982 waxaa bilowday dagaalkii jabhadihii mucaaradka ahaa oo ay ugu horreeysay SSDF (Somali Salvation Democratic Front),SNM(Somali National Movement),iyo jabhadaha lamidka ah oo kala horyimid dowladda dagaal hubeeysan kana soo abaabulan dhanka Ethiopia kuna wajahan Soomaaliya.

Culimmada hadafkooda wuxuu ahaa in dadwayne iyo dowladba ay dhaqangaliyaan diinta islaamka lana hirgaliyo ku dhaqanka shareecada islaamka.

Dawladda waxay culays saartay in la koontroolo masaajidda iyo culimmada wax akhrinayso sidaa darteed waxaa lasoo rogay in qof aan waaxda arrimaha diinta ee wasaaradda cadaaladda ka heeysan fasax, uusan waxba akhrin Karin waxna sheegi Karin taasoo loogu danlahaa in aan lasiin ruqsadda culimannimada inta aan la rabin in ay wax akhriyaan.

Waxaa ka muuqda halkaan warqaddii aan ku codsaday in la ii ogolaado fidinta diinta islaamka iyo nikaaxinta.Waxaana ii ogolaaday agaasinka waaxda diinta oo ahaa Cabdiraxmaan X. Muumin allaha u raxmadee oo aan dad u kaxeeystay.

Jamhuuriyadda Dim. Soomaaliya
WASAARADDA GARSOORKA
IYO ARRIMAHA DIINTA

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة العدل والشئون الدينية

- WAAXDA DIINTA -

الرقم _____

Lam. .....**waxaa ku xiran** DIIN/111/6-787 مرفق به _____

Jawaabta Warq. Lam. ..... الموضوع _____

oo ah Taariikh 18/4/89

UJEEDDO : OGOLAANSHO FIDINTA DIINTA ISLAAMKA

Ku:-SHEEKH CABDIRAXMAAN SHEEKH CUMAR AXMED = MUQDISHO =
OG:-GUDDOOMIYAHA MAXKAMDDA DEGMADA H/WADAAG "

===ooOoo===

Iyadoo la tixraacayo Arjiga taariikhdiisu tahay 1/6/88 ee aad ku codsanaysay in laguu ogolaado in aad ka mid noqoto Culimada loo aqoonsanayahay Fidinta Diinta Islaamka.

Markaa waxa lagula socodsiinayaa in laguu ogolaaday in aad ka mid noqoto Culimada loo aqoonsanayahay in ay Diinta Fidiyaan, waxana lagaa codsnayaa in aad ka dheeraato wixii Diinta Islaamka khilaaf u keeni kara, lana dagaalanto wixii Diinta Islaamka wax u dhimaya.

HAWL-WACAN

AGAASIMAHA WAAXDA DIINTA

- Jaalle Sh. Cabdi-Raxmaan XX Xaaji Muumin-

W/asaaradda Garsoorka iyo Diinta

Jamhuuriyadda Dim. Soomaaliya
WASAARADDA GARSOORKA
IYO ARRIMAHA DIINTA
-AGAASIMAHA ARRIMAHA DIINTA-

جمهور ية الصومال الديمقراطية
وزارة العدل والشئـــون الدينية

Lam: _____ waxaa ku xiran _____
Jawaabta Warq. Lam. DDN/11/3-1115
oo ah Taariikh _____

الرقـم : _____
مرفـق بـه : _____
الموضـوع : _____

Muqdisho, 7/6/1988

UJEEDDO:- OGGOLAASHO RUKHSAD NIKAAX -

Ku: SH. CABDIRAXMAAN SH. CUMAR AXMED
Og: GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA DEGMADA H/WADAAG = MUQDISHO =

======= (ooOoo) =======

Ayadoo la tixraacayo codsiga taariikhdiisu tahay 1/6/1988, ee aad ku codsanaysay in laguu oggolaadox Rukhsadda Nikaaxa ah.

Haddaba, waxaa lagula socodsiinayaa in laguu oggolaaday Rukhsadda Nikaaxa ah ee aad soo codsatay, Nikaaxintaadu wax ka soo qaad malaha haddii aadan muddo 15 maalmood gudaheeda ku geyn waydo Xafiiska loogu tala galay, waxaana lagu farayaa inaad u hoggaansanaato Sharciyada Dalka iyo Diinta Islaamka.

AGAASIMAHA ARRIMAHA DIINTA
- Maalle Cabdiraxmaan Xaaji Muumin -

Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

Taageerayaasha jabhadaha oo hoos ka guuxayo waxay u arkayeen dhaqdhaqaayada islaamka ee dowladda diin ahaan uga soo horjeeda in laga faaiideeysto sidii dowladda loogu ridi lahaa maxaa yeelay waxay ahaayeen xoogagga jiro ee habaysan ,taasoo aad culimada ugu baraarugsanaayeen.

Dhaqdhaqaayada islaamka marnaba ma aheeyn hadafkooda in ay lumiyaan qarannimmada Soomaaliya waddankana fowdo ka dhigaan sidaa darteed waxay u dulqaadanayeen dhib kasta oo loo geeysto.

Dad badan ayaa masaajidda usoo galay mucaarad ahaan oo leh diintii ayaa lagu tuntay,culimadii ayaa dil lagu xukumay waa in laga dhiidhiyaa arrinkan oo la ridaa dowladdan gaalada ah. Culimmada iyadoo ay xabsiyada si xaq darro ah looga buuxiyey, islamarkaana loo dilay haddana marnaba wax ma gaalaysiin ee waxay wadeen in ay diinta dadka baraan, takfiirka oo ah dad aad u yar islamarkaana qarsoon ayaa wax gaalaysiin jiray. Takfiirka laftooda salaadda ha ka goostaan dadka laakin kuma dhiirran in ay wax dileen.Hal dhacdo ayaa la sheegay in reer xamar ah oo xabsiga takfiir ku noqday in markuu soo baxay uu dharka booliska intuu soo xirtay isaga iyo saaxiibadiis uu dilay adeerkiis, kaddibna fakaday oo Kenya galay.

Dhaqdhaqaaq culus kaddib iyo si ay dowladda u kasbato dadwaynaha wuxuu madaxwaynaha Maxamed Siyaad u fidiyay cafis culimadii dilka lagu xukumay iyo kuwii kaleba taasoo aad nooga farxisay dadwaynuhuna ku farxeen sidaa si leeg.

Qaybta 12-aad kala soco linkigan http://somalitalk.com/tag/uur-doox/ , insha Allaah.

Qore: Sheikh Cabdiraxman Sheikh Cumar
burdhinle@yahoo.com

FAAFIN: SOMALITALK.COM